Jamhuuriyada Somaliland

Golaha Wakiilada JSL




# Warbixinta

## Shir-gudoonka ee Kal-fadhigii 19aad

25 Aug -23 Oct 2012

*December 2012*

**Ku: - Mudanayaasha Golaha Wakiilada JSL.**

**Ujeedo: - Warbixinta Shir-gudoonka ee kal-fadhigii 19aad**

*Mudanayaal*

Si aad hawlaha u qorshaysan ***kal-fadhiga 20aad*** ee Golaha Wakiilada u dardar galino una dhameystirno hawlaha inoo qorsheysan inta lagu jiro Kal-fadhigan inagoo gudanyna Waajibaadkeena Qaran, waxaan halka idiinku soo gudbinaynaa waxqabadkii Golaha Wakiilada ee *kal-fadhigii 19aad* oo dhamaystiran si aad u xasuusataan..

**Kal-fadhigii 19aad**

| No | Kal-fadhiga | Taariikhda uu furmay | Taariikhda uu xidhmay |
|---|---|---|---|
| 1. | 19aad | 25/08/2012 | 23/10/2012 |

Kal-fadhigan oo Golahu qabtey hawlo farabadan kana mid ahaayeen ansixinta 6 Xeer oo 5 kamid ah Golaha Guurtida ku maqan yihiin, midna Madaxweynuhu dhaqan galintii rasmiga ahayd ku faafiyay Markii Goluhu ansixiyay ka dibna u gudbiyay iyo waxyaabo farabadan oo kale, sida warbixintan ka muuqandoonta.

## 1. Ajandaha Kalfadhiga 19aad ee Golaha Wakiilada.

**01/09/2012**

1. Warbixinta Shirgudoonka, Guddida Joogtada ah iyo Gudiyadda Golaha Wakiilada .
2. Mashaariicda Sharci ee Golaha Horyaal.

| No. | Magaca Xeerka | M/marayo | Cida Gacanta ku haysa |
|---|---|---|---|
| 1. | Xeerka Baanka Islaamka | Akhriska 2aad | Gole waynaha |
| 2. | Xeerka Nabadgelyada Wadooyinka | Qabyo Qoraal | Gole waynaha |
| 3. | Xeerka Maamuuska Madaxweynaha iyo ku-xigeenka | Qabyo Qoraal | Gudidda Dhaqaalaha |
| 4. | Xeerka Fayodhowrka Hilibka | Akhriska 1aad | Gudidda Degaanka Xoolaha Kh.Dabiicigaa |

| | | | |
|---|---|---|---|
| **5.** | Xeerka Asaaska komishanka Maamulwanaaga iyo La-Dagaalanka Musuqmaasuqa. | Qabyo Qoraal | Gudida Ilaalinta, Hantida qaranka |
| **6.** | Xeerka ka Ganacsiga Hawlaha Banka | Akhriska 1aad | Gudidda Dhaqaalaha |
| **7.** | Xisaab-xidhka Dawladda 2008,2009,2010 | Lagu celiyey Hantidhowrka Guud | Hantidhawraha Guud ee Qaranka |
| **8.** | Xeerka Statistics law | Qabyo Qoraal | Gudidda Arrimaha Dibadda |

3. Uyeedhista  Masuuliyiinta Qaranka
4. Ansixinta Masuuliyiinta Qaranka
5. Iyo Wixii kale ee soo kordha

## 2. Warbixintii Shirgudoonka iyo Gudiyada kale ee Golaha

Warbixintii shirgudoonka ee kal-fadhigii 18aad ayaa ugu horaysay warbixinadii kal-fadhigaa laga akhriyay Golaha

| No | Gudidda | Cida  jeedisay |
|---|---|---|
| 1. | Warbixintii Shirgudoonka ee Kal-fadhigii 18aad | C/risaaq S. Ayanle    Xoghaya Guud |

## 3. Xeerarka Goluhu Ansixiyay.

| No | Xeerka | Taariikhda | Halka Loo gudbiyay |
|---|---|---|---|
| 1. | Xeerka Baananka Islaamiga ah | | Madaxweynaha |
| **2.** | Xeerka Wadamarista Gaadiidka | 02/10/2012 | Golaha Guurtida |
| **3.** | Xeerka Baadhista iyo fayadhowrka Hilibka | 02/10/2012 | Golaha Guurtida |
| **4.** | Xeerka Asaaska Komishanka Maamul Wanaaga | | Golaha Guurtida |
| **5.** | Xeerka Hay'ada Sirdoonka Qaranka | | Golaha Guurtida |
| **6.** | Xeerka Gudidda Xirfadlayaasha Caafimaadka | 23/10/2012 | Golaha Guurtida |

## 4. Masuuliyiinta Goluhu Ansixiyay

| No | Magaca Masuulka | Xilka |
|---|---|---|
| 1. | Md. Abiib Diiriye Nuur | Wasiirka Wasaarada Warfaafinta |
| 2. | Md. Cali Siciid Cilmi | Wasiirka Wasaarada Ciyaaraha iyo Dhaqanka |
| 3. | Md. C/laahi Maxamed Cakuse | Wasiir ku-xigenka W/warfaafinta |
| 4. | Md. Keyse Cabdi Yuusuf | Wasiiru-dawlaha Gobolada Barri |

## 5. Masuuliyiinta Golaha Warbixino siiyay.

Intii lagu jirey kal-fadhiga 19aad lagu jirey waxaa Golaha Warbixino Hawlaha ay qaranka u hayaan ka siiyay **Md. Xuseen Axmed Caydiid** Wasiirka Wasaarada Cadaalada oo ka warbixiyay Wax ka-badalkii Goluhu markaa ku sameynayay Xeerka Qareenada oo aan ansixiney, sidoo kale waxaa Warbixin ka siiyay Golaha Xeerka Xirfadlayaasha Caafimaadka Wasiirka Wasaarada Caafimaadka **Md. Xuseen Xooga** iyo Gudidda Xirfadlayaasha Caafimaadka isla markaana Goluhu su'aalo ka weydiiyay Wasiirka iyo Gudiddaba Xeerkan Xirfadlayaasha caafimaadka.





| No. | Magaca Masuulka | Xilka Masuulka |
|---|---|---|
| 1. | Md. Xusen Axmed Caydiid | Wasiirka Wasaarada Cadaalada |

| | | |
|---|---|---|
| **2.** | Md. Xuseen Xoog | Wasiirka Wasaarada Caafimaadka |

## 7. Mudanayaal Xubinimadii waayay oo la badaley.

Intii lagu jirey kal-fadhigan 19aad waxaa Shirgudoonka Golaha Wakiiladu ka dib markuu **Qodobka 50aad F/5aad** ee Dastuurka Qaranka iyo **Qodobada 14aad F/2aad** ee Xeerka Doorashooyinka Golaha iyo **Qodobka 4aad F/3aad** ee Xeer-Hoosaadka Golaha Wakiilada, waxaa xilkii Xubinimo ee Golaha Wakiilada Waayay Mudanayaashan kala ah.

1. Md. Maxamed Cali Jibriil
2. Md. Mahdi Xasan Sugaal
3. Md. Ikraan X. Daa'uud
4. Md. Axmed Maxamed Cali (Beegsi)
5.

wuxuuna u gudbiyay Gudidda Doorashooyinka Qaranka inay soo Gudibiyaan 4 mudane badalaya xilka Mudanayaashaa hore, waxayna Komishanku soo gudbiyeen Magacyada mudanayaasha Cusub oo ka dib markii Maxkamadu soo dhaarisey Golahana loo soo gudbiyay, kuwaas oo kala ah.

1. Md. C/raxmaan Maxamed Jaamac (Kulmiye)
2. Md. C/qaadir Jimcaale Tukaale
3. Md. Yaasiin Cali Warsame
4. Md. Fu'aad Sh. Muxumed Cabdale

## 8. Xeerarka Guddiyadu hayaan

| No. | Magaca Guddiga iyo Xeerarka ay kala hayaan |
|---|---|
| **1.** | **Guddiga Dhaqaalaha, Ganacsiga iyo Maaliyada** |
| . | 1) Xeerka Midaynta Cashuuraha<br>2) Xeerka Caymiska Qaranka<br>3) Xeerka Low of Establishment of Somaliland Agency<br>4) Xeerka Maamuuska Madaxweynaha iyo M/ku-xigeenka |
| **2.** | **Guddiga Garsoorka, xuquuqal insaanka iyo Dastuurka** |
| | 1) Wax-ka bedelka iyo Kaabista Xeerka Ciqaabta guud.<br>2) Xeerka Guddida Shuruucda Qaranka |
| **3.** | **Guddiga Joogtada iyo Anshaxa** |

| | |
|---|---|
| | 1) Xeerka Anshaxa Guud Xeerka<br>2) Xeerka Habka Maamuuska Mudanayaasha |
| **4.** | **Guddiga Arimaha Bulshada iyo Diinta** |
| | 1) Xeerka Shaqaalaha Dawladaha Hoose<br>2) Xeerka Saxaafada<br>3) Xeerka CIyaaraha |
| **5.** | **Guddiga Arimaha Gudaha, difaaca Iyo nabadgalyada Guud** |
| | 1) Xeerka Caasimada<br>2) Xeerka Saamiga Kootada Haweenka iyo dadka laga tirade badan yahay<br>3) Xeerka Booliiska |
| **6.** | **Guddiga Arrimaha Dibada iyo Iskaashiga Caalamiga ah** |
| | 1) Xeerka istaatistikiska Statistics law |
| **7.** | **Guddiga khayraadka dabiiciga ah, Xoolaha iyo Macdanta** |
| | 1. Xeerka shidaalka (petroleum Act)<br>2. Xeerka Macdanta (Mineral Act)s<br>3. Xeerka Kaluumeysiga |
| **8,** | **Guddiga Ilaaalinta Hantida Qaranka iyo Musuqmasuqa** |
| | |

## 9. Waxqabadka Guddiyada Golaha.

**Gudidda Joogtada iyo anshaxa.**

Guddigu iyadoo ka wakiila Fasaxyada Golaha waxay intii lagu jirey fasaxan iayadoo dalka ay ka dhacayeen doorashooyinka Golayaasha Deegaanka Mudanayaashuna u kala baxeen Gobolada iyo Degmooyinka Dalka si ay uga qaybqaataan doorashada, sidaa darteed wax Fadhi iyo kulamo ah mey yeelan Gudidda Joogtadu intii lagu jirey fasaxa ee 8da wiig ahayd.

**Gudidda Arrimaha Gudaha, Difaaca iyo Nabadgalyada.**

**Kulan Cilmiyeedkii:-** Gudidda Arrimaha Gudaha, Difaaca iyo Nabadgalyadu waxay workshop socdey 3 casho u sameeyeen Xeerka Booliiska oo Gudiddu Gacanta ku hayso, Workshopkan waxaa ka soo qeybgalay hay'adaha iyo Qeybaha kala duwan ee Xeerkan khuseeyo

(stakeholders) sida saraakiisha Booliiska, Mudanayaal ka tirsan barlamaanka, Wasaarada Arrimaha Gudaha, Cadaalada, hay'ada UNDP, ardeyda jaamacadaha iyo Aqoonyahano kale.




Intii kulan cilmiyeedkani socdey waxaa lagu naaqishey Qeybaha Xeerkani ka kooban yahay iyadoo Gudidda iyo ka soo qeybgalayashu waxyaabo farabadan xeerka booliiska ku dareen isla markaana dood iyo soo jeedimo ka dib halkaa lagu soo bandhigey la islana gartey sidii xeer wax tar u leh cida ku shaqeynaysa uu noqon lahaa.

**03/10/2012** waxay guddidu kulan xog waraysi ah xafiiskeeda kula yeelatay taliyaha Hay'ada sirdoonka qaranka, kulankaas oo ay su'aalo kaga weydiisay Xeerka hay'ada sirdoonka qaranka oo ay guddidu gacanta ku haysey xiligaas

**09/10 2012** wa ay Guddida Arimaha Gudaha Nabadgelyada iyo Difaacu ay Golaha u gubisey xeerka Aasaaska Hay'adda sirdoonka qaranka xeerkan oo goluhu u ansixiyey si aqlabiyad ah.

**20/09/2012** waxaa guddida arimaha gudaha nabad-gelyada iyo difaacu ay usoo gudbisey ansixinta wasiiru dawlaha nabadaynta gobolada bariga Md. Keyse Cabdi Yuusuf kaas oo goluhu uu ku ansixiyey cod aqlabiyad ah.

**26/09/2012** waxaa guddidu kulan xog waraysi ah kula yeelatay xafiiskooda wasiirka wasaarada arimaha gudaha mudane Maxamed Nuur Caraale (Duur)

## Gudidda Arrimaha Bulshada iyo Diinta

Gudidda arrimaha Bulshadu kulan iyo waxqabadkeedii kal-fadhigan uu kuu muujineysa Shaxdan hoose

| Date | Activities | No. of MPs in present | Decision |
|---|---|---|---|
| **25-1/05/12** | Committee visit Saxil &Togdher Region by supervising Social affairs activities | Chairman, du'ale, Gutale, Hoori and sahal | Committee Gets from Saxil &Togdher Region all data about Social affairs situation and make reports to HoR |
| **19/06//12** | Committee and IRI hold health caucus in HoR and discussed health affairs of s/land | 7mp, vice minister &DG of health and AIDs-com. | Committee and other MP and also members from ministry of health discussion health activity and policy in S/land |
| **04/07/12** | Committee met with IRI and request it to support them health caucus meeting cost | Chairman and du'ale | Committee and IRI agency agreed to arrange health caucus meeting together on 11/jully/2012 in HOR |
| **02/07/12** | Committee met chairman/deputy of civil servant agency to insure their appointment | Chairman, deputy, duale and askar, | Committee decided to propose house of representative to approves them their positions that appointed by |

| | | | |
|---|---|---|---|
| | | | president |
| **02/07/12** | Committee met with minister of information to insure his appointment | Chairman, deputy, duale and askar, | Committee decided to propose house of representative to approve him as the Minister of information |
| **11/07/12** | Committee and IRI hold health caucus in HoR and discussed health affairs of s/land | 3 of committee and other 7mps | To make oversee health centers in Harg. 17-18/07/012, and next two days overlook Awdal Region health centers |

**Gudidda Khayraadka Dabiiciga, Macdanta iyo Xoolaha Nool.**

## 12. Safaradii Dibada ee Golaha Wakiilada.

- ***2-3 December 2012*** waxaa safar ugu baxay Magaala Madaxda Dalka aynu jaarka nahay ee Djabuuti **Md. Axmed Maxamed Kijaandhe iyo Md. Axmed Ducaale Bulaale**, safarkaas oo Martiqaad ay Ururka dalalka Geeska Afrika ee IGAD ku casuuntey labadaa Xubnood oo ka tirsan Guddida Arrimaha Bulshada si ay uga qeybgalaan shir lagawada hadlayay Caafimaadka oo ka dhacay Magaalada Jabuuti.

  Intii labada mudane ku jireen safarkaas waxay ka qeybgaleen kulaas laga hadlayay caafimaadka oo socdey laba maalmood kana soo qeybgaleen wufuud ka kala socda wadamada Geeska Afrika ee ku midoobey Ururka IGAD.

- **Ethiopia:-** ***08 December 2012*** waxaa Safar ugu baxay martiqaad ay ka heleen dalka aynu jaarka nahay ee itoobiya Gudoomiyaha Golaha Wakiilada **Md. C/raxman Maxamed C/laahi**, Gudoomiye Ku-xigeen 1aad **Md. Baashe Maxamed Faarax** iyo Xoghayaha Guud **Mr. C/risaaq Siciid Ayaanle**, martiqaadkan oo Barlmaanka itoobiya ku casuumey ka qaybgalka Xuska iyo Dabaaldega Maalinta Qoomiyadaha Itoobiya oo ka dhacdey Magaalada .

 

Safar oo qaatey mudo 3 maalmood, waxay waftigan qayb ka ahaayeen Masuuliyiin farabadan oo ka kala yimi dalal kala duwan oo Afrikan iyo caalamka kaleba ah, waxaana loo soo dhoweeyay si heer Maamuuseed leh, waxaana halkaa xus balaadhan iyo dabaal degyo ku sameeyay qoomiyadaha farahabadan ee dalkaasi ku nool, intii ay safarkan ay ku jireen waxay kulamo la yeesheen Gudoomiyaha Baarlamaanka, Reysal Wasaaraha iyo Wasiirka Arrimaha Dibada dalkaas Itoobiya

**C/risaaq Siciid Ayaanle**
**Xoghayaha Guud ee Golaha Wakiilada JSL.**